

Fahamka Saacidaadda iyo Taageerada ee Ka-Soo kabashada Waxbarashada Gaarka ah ee Minnesota

(Understanding Minnesota Special Education Recovery Services and Supports - Somali translation)

Arday badan oo hela Barnaamijyada Waxbarashada Shakhsi ahaaneed (IEPs) waxay la kulmeen nusqaan xagga adeegyadooda iyo/ama, ma aysan awoodin inay horumar micno leh ka garaan ujeedooyinkooda ku xusan Qorshaha Waxbarashadooda Shaqsi ahaaneed IEP, tasoo sabab u ah saamaynta COVID. Waxa la ansixiyey Sharciyo Federaalka iyo Gobolka si ay gacan uga geystaan dib u habeynta khasaarahan waxbarasho, iyo helitaan la'aanta, si loo helo waxbarasho dadweyne oo bilaash ah oo ku habboon (FAPE). Macluumaadkan waxey waalidiinta ka caawinayan in ardayda leh barnaamijka Waxbarashada Qaaska ah (IEPs) ee Minnesota si aad ugala hadasho u qalmida suurtoogalka ah ee ilmahaagu u leeyahay adeegyada iyo taageerada ka soo kabashada waxbarashada gaarka ah.

Kulanka IEP ee lagaga hadlayo saamaynta COVID

Minnesota waxay ansixisay sharci, u baahan in degmooyinka dugsiyada iyo dugsiyada charter-ka ay ku casuumaan waalidiinta/dadka ilmaha masuul ka ah IEP kulan kooxeed si ay uga hadlaan in ilmahaagu la kulmay:

1. Horumar la'aan ah Qorshaha Adeegga Qoyska ee Shakhsi ahaaneed (IFSP) ama yoolalka IEP
2. Horumar la'aan ah manhajka waxbarashada guud
3. Lumin waxbarashada ama xirfadaha oo sabab u ah qaska la xiriirta COVID

Kooxdu waxay u baahan tahay inay ka hadasho haddii adeegyada iyo taageerada waxbarashada gaarka ah ee cusub ama ka duwan loo baahan yahay si wax looga qabto khasaarahaas. Kooxda IEP ee ilmahaaga waxa looga baahanyahay inay kuu soo diraan martiqaad kulankaan sida ugu dhakhsaha badan ee suurtoogalka ah, laakiin an ka daba mari karin December 1, 2021.¹ Kulankan waxa uu qayb ka noqon karaa kulanka IEP-ga sannadeed.

Kooxda IEP waa inay tixgeliyaan 6 shay marka ay go'aaminayaan u-qalmitaanka iyo go'aaminta nooca adeegyada loo baahan yahay:

1. Adeegyada ilmahaagu ee xusna IEP, ka hor COVID
2. Awoodda ilmahaagu u leeyahay helitaanka adeegyada iyo taageerada
3. Horumarka ilmahaagu ka samaynayo yoolasha IEP iyo manhajka waxbarashada guud
4. Xirfadaha ilmahaagu lumiyay oo sabab u ah carqabadka waxbarashadooda
5. Sababaha muhiimka ah ee uu ilmahaagu si buuxda uga qayb qaadan karin dugsiya, oo ay ka mid yihiin: qasaaro qoyskaaga soo gaaray, wax isbedel ah oo qoyska ku dhacay sida iyago lumiyeye guriga ama daqliga (mushaaradda), iyo dhibaato ama xanuun kale ee qoysku la kulmay.
6. Noocyada adeegyada ka caawin lahaa ilmahaaga inuu wax barto

Kulankaan, kooxdu waa inay hubisaa in heerka ardeygu tacliinta waqtigan marayo iyo Waxqabadka shaqada ee loo yaqaan (**PLAAFP**) ee qaybta IEP ee ilmahaaga in uu yahay mid cusub oo xaqiiqi ah. Qaybta PLAAFP waa a sawir tilmaamaya xirfadaha iyo baahida ilmahaaga hadda leeyahay. Haddii kooxdu ay isla garato si loo ogaado halka xirfadaha ilmahu hadda taagan tahay (PLAFP), in akhbaaro siyaada ah loo baahan yahay, ama haddii aad

¹ Laws of Minnesota 2021, 1st Special Session, chapter 13, article 5, section 1, subd. 1

codsato akhbaaro siyaada ah, degmada dugsigu waxay samayn kartaa dib-u-qiimeyn. Dib u qiimayn kasta waa in ay tixgelisaa dhammaan dhinacyada waxbarashada u baahan, xataa kuwa aan inta badan lala xidhiidhin dib-udhaca, ee ku taxan IEP-ga ilmahaaga.²

Haddii aad la go'aansatid kooxda IEP inteeda kale in ilmahaagu u qalmo, isbeddel kasta oo ku yimaada waxbarashadooda gaarka ah iyo adeegyada waa in lagu daraa IEP-gooda. Waa in la raaco nidaamka xuquuq dhowrka Taas macnaheedu waa in degmadu waalidka siisa Ogaysiiska Qoritaanka Hore (PWN) iyo koobi ah IEP-ga la soo jeediyay. Adeegyada waxaa lagu dari karaa IEP qaab ahaan: adeegyada sanad dugsiyeedka la dheereeyey (ESY), adeegyo IEP dheeraad ah, adeegyo magdhow ah, ama adeegyada kale ee ku habboon. Mid kasta oo ka mid ah adeegyadan ayaa lagu sifeeyay bogga soo socda.

Adeegyada sanad dugsiyeedka ee la dheereeyey (ESY)

Adeegyada sanad dugsiyeedka ee la dheereeyey (ESY) waa adeegyada waxbarashada gaarka ah ee la bixiyo marka dugsigu aanu inta badan furneyn. Tusaale ahaan, waxay dhici karaan fasaxa xagaaga, ama kahor ama kadib saacadaha caadiga ah ee dugsigu furan yahay. Dib-u-noqosho, faraq dhanka waxbarashada ah, ama mid gaar u ah saameynta COVID ayaa la tixgalin karaa marka la go'aaminayo in ilmahaagu helo adeegyada ESY oo ah qaab ka soo kabasho waxbarasho gaar ah.

Adeegyo Qorshah Wabrashada Gaar-ahaneed (IEP) dheeraad ah

Ilmahaagu waxa laga yaabaa inay qabaan baahiyo cusub oo la xidhiidha naafonimadooda, baahiyo cusub oo shucuur bulsheed, ama meelaha qaarkood ay lumiyeen xirfado. Waxa laga yaabaa inay u baahdaan taageero cusub ama ka duwan kuwi hore. Tani micnaheedu waxu noqon karaa; kordhin inta jeer, ama dheryn Adeegyada IEP hadda jira, ama ku darida adeegyo iyo taageerooyin cusub. Waa muhiim in kooxda IEP ay haystaan sawir dhamaystiran oo cusub oo ku saabsan baahiyaha ilmahaaga marka ay tixgelineyaan adeegyada IEP ee dheeraadka ah.

Adeegyada Magdhowga ah

Ardayda qaarkood waxay la kulmeen dib u dhac ku yimid adeegyadooda IEP, taasoo ay sababtay arrimo ay ka mid yihiin xidhiidhka dugsiga iyo beddelka oo u dhexeeya qaabab waxbarasho oo kala duwan. Adeegyo badan oo IEP ah ayaan si fiican ugu hirgelin qaababka waxbarashada fogaanta. Qaar ka mid ah yoolalka IEP iyo adeegyada waxay ku salaysnaayeen jawiga shakhsi ahaaneed ee dugsiga, ama loo baahan yahay shakhsi ahaan bulsho is dhexgalka. Caqabadahan iyo kuwa kale ayaa arday badan ku adkeeyey inay horumar la taaban karo ka sameeyaan Hadafkooda IEP-ga sanadlaha ah ama manhajka waxbarashada guud. Ujeedada adeegyada magdhowga waa laga qanciya ardeyda luminta xirfadaha, ama horumar la'aanta sababay inta lagu jirey aafada COVID. U qalanka adeegyada magdhowga waxey ku xiran tahay baahida ardeyga. Sababta gaarka ah ee kalifey dib u dhaca adeegyada IEP ee ardayga ma aha mid saameyn leh. Xataa haddii ilmahaagu ka baxay dugsiga sare ee shahaado qaatay, ama uu gaadhay da'da aysan xaq u laheyn mardambe waxbarashada dadweyne oo bilaash ah oo ku habboon (FAPE) (Julaay 1 ka dib dhalashadooda 21aad), waxaa laga yaabaa inay weli u qalmaan adeegyada magdhowga. Kooxda IEP ayaa go'amisa nooca, qaddarka, iyo muddada ee adeegyada magdhowga, oo ku salaysan shakhsi ahaan. Tani waxay qaadan kartaa qaabab badan, oo ay ka mid yihiin adeegyada IEP cusub, umeerin, ama u-celinta waalidka ee umeerinta dibadda ama barnaamijyada.

Wasaaradda Waxbarashada ee Minnesota ayaa daabacday liis su'aala ah oo ay kooxaha IEP inay tixgeliyaan tahay marka la go'aaminayo u-qalmitaanka adeegyada magdhowga. Liiskiisu waxa uu ku yaalaa bogga 12 ee [*Hagaha La Cusboonaysiiyay ee wax ka qabashada Saamaynta COVID-19 ee Ardayda Naafada ah \(Updated Guide to Addressing the Impact of the COVID-19 Pandemic on Students with Disabilities\)*](#), oo aad ka heli karto qeybta Nidaamka Habraaca Sharciyeed ee bggaan: <https://education.mn.gov/MDE/dse/health/covid19/spedcovid19>.

² [*Updated Guide to Addressing the Impact of the COVID-19 Pandemic on Students with Disabilities*](#); MN Dept. of Ed., updated July 2021

Adeegyada kale ee ku habboon

Arday badan oo leh iyo kuwa aan lahayn IEPs ayaa laga yaabaa inay ku soo noqdaan dugsiga iyagoo muujinaya astaamo dib u dhac ama walwal leh. Adeegyada soo kabashada waxbarashada guud waxay diyaar u noqon doontaa dhammaan ardayda oo idil. Waxa loo naqshadeeyey inay ka caawiyaan ardayda ka soo kabashada khasaaraha waxbarasho iyo taageeraan baahida cusub ee caafimaadka dhimirka. Adeegyadan waxaa ku jiri kara taageerooyin kala duwan laga bilaabo dugsiga ka dib shaqo-guriyeedka caawinta la-talinta iyo ilaha kale ee caafimaadka dhimirka. Kuwani bedel uma aha adeegyada soo kabashada waxbarashada gaarka ah (ESY, IEP dheeraad ah, iyo adeegyada magdhow) ee kor lagu sifeeyay.

Maxa dhacaya hadaan khilaaf?

Haddii aad ku khilaafsan tahay kooxda IEP inteeda kale ee ku saabsan adeegyada soo kabashada, waxaad xaq u leedahay inaad codsato kulan xallinta khilaafaadka si loo xalliyo tabashooyinkaaga. Si aad wax badan uga ogaato fursadahaaga, booqo [PACER.org/learning-center/dispute-resolution/du-process-options](https://pacer.org/learning-center/dispute-resolution/du-process-options) ama wac (952) 838-9000 ee codso in aad la hadasho qof shaqaalaha PACER ee waalidka u dooda.

Wixii macluumaad dheeraad ah, waxaad ka heli karta kheyraadka daabacaadda ah ee Wasaaradda Waxbarashada ee Minnesota ee soo sodca. Waxaad keydsan karta khoraaladan adigo tuujiya cinwaanka. Waxaad kalo ka heli karta qeybta habraaca shariyeed: <https://education.mn.gov/MDE/dse/health/covid19/spedcovid19>.

- [*Su'aalaha Inta Badan La Isweydiiyo: Bilawga Sannad Dugsiyeedka 2021-22 iyo Sharciga Adeegyada Soo Kabashada Waxbarashada Gaarka ah ee Minnesota*](#)
- [*Hagaha la cusboonaysiiyay ee wax ka qabashada saamaynta xaaladda COVID-19 ku leeyahay ardayda naafada ah*](#)